

## Waxaa loogu talogaley qofka loo qorey waxyaabaha nafaqada ama qalabka la socda tuumbada sida tooska ah loogu quudiyo caloosha (sondmatningstillbehör)

Waxaa aad ka dalban kartaa alaabtaas:



- Adeega elektaroonik ah ee (e-tjänster) 1177 Vårdguiden  
<https://regionervice.vgregion.se/lmn/bestallningleverans/>
- Xafiiska adeega macaamiisha ee bakhaarka Skövde (Skövdedepån)  
Lambarka telefoonka: 010 – 441 31 90

## Sideen u helayaa isla markaana goortee ayaan heli doonaa alaabta la ii qorey?

Waxaa alaabtaada laguugu keenayaa gurigaaga ama goobaha laga soo qaato alaabta qiyaastii 5 maalmood oo maalmaha shaqada ah. Waxaa aad kala dooraan kartaa in aad hesho qayb ahaan ama gabi ahaanba alaabta lagu qorey oo dhan. Marka aad rabto in laguugu keeno alaab cusub waxaa aad ka dalbanaysaa 1177.se ama waxaa aad waceysaa xafiiska adeega macaamiisha.

Macluumaad intaas ka abadan waxaa aad ka heli kartaa bogga internetka ee LMN: <https://regionervice.vgregion.se/lmn/>.

Haddii aad rabto in gurigga laguugu keeno:

- Fadlan wargali haddii aad lacala bedesho cinwaanka la keenayo alaabta, koodka irridka/albaabka lagu soo galo iyo lambrakaaga telefoonka.

Haddii aad aad rabto in alaabta la geeyo goobaha alaabta laga soo qaadan karo:

- Waxaa dhici karta in laguugu soo diri fariin ku saabsan wakhtiga ay alaabtaadu ay imanayso waxaa ay fariintu noqon kartaa mid qoraal ah (SMS) oo laguugu soo dirayo telefoonkaaga gacanta, e-mayl ama warqad lagu soo diri doono cinwaanka guriggaaga.
- Haddii qof aad qaraabo tihiiin kaaga soo qaadayo alaabtaada boosta waa in uu qofkaasi haysto kaadhka aqoonsiga si uu isku cadeyn karo.
- Haddii aad ku soo qaadan weydo alaabtaada muddo 14 maalmood gudahood ah dib ayaa loo celin doonaa alaabtaada.

## Cabashooyinka iyo soo celinta

Soo celinta waxaa ay khuseysaa oo kaliya dalabyada cusub oo kaliya iyo waliba in baakada ay alaabtu gudaha ugu jirto oo aan la furin. Alaabooyinka hadhaaga dib looma soo celin karo. Haddii lagu keeney alaab qaldan oo aan aheyn wixii aad dalbatey, tiro qaldan ama haddii uu wax dhaawaca soo gaadho baakada lagu keeney alaabta fadlan la xidhiidh xafiiska adeega macaamiisha ama isticmaal foomka LMN ee ku jira bogga internetka ee:

<https://regionervice.vgregion.se/lmn/bestallningleverans/avvikelser/retur/>

## Immisa ayaan bixinayaa? \*

- Nafaqada – carruurta (Nutrition – barn)  
Shaqsiiyaaadka ka yar 16 sanno khidmada bukaanu bixinayo waa 120 karoon halkii mar ee lala soo baxo qiyaastii xaddi dabooli kara baahida ugu badsnaan 90 maalmood. Haddii aad lala soo baxdo marar muddada lagu guda jiro waxaa la soo dalacayaa 120 dalab kasta oo la sameeyo För
- Nafaqada – dadka waaweyn (Nutrition – vuxna)  
Shaqsiiyaaadka ka weyn 16 sanno khidmada bukaanu waa boqolkiib 50 qiimaha sheygaasi joogo. Bukaanada sida joogtada ah u quuta alaabada nafaqada ee loo qorey, ee lagu magacaabo nafaqo buuxda (fullnutrition) waxaa ay bixin doonaan ugu badnaan 1500 oo karoon bishii.
- Qalbka la socad tuumbada sida tooska ah loogu qadiyo caloosha (Sondmatningstillbehör)  
Qalabka la socda tuumbada sida tooska caloosha loogu quudiyo lama bixiyo haba yaraate wax khidmad ah carruurta ama daka waaweyn midkoodna.

## Goorma ayey iman doontaa qaan sheegashadu (fakturan)?

Qaan sheegashadu (Fakturan) waxaa ay ku iman doontaa boosta muddo hal bil ka dib marka ay ku soo gaadho alaabtii aad dalbatey.

Wixii su'aalo ah ee la xidhiidha qaan sheegashada (faktura) waxaa lagu gudbin doo qaybta qaan sheegashada bukaan socodka (Patientfakturaenheten) lambarka telefoonka 010 – 441 01 00.

<b>*Kharashka bukaan socodka iyo xeerarka kabida (Patientens egenavgift och subventionsregler)</b>	
Bamka nafaqada ee la socda tuumbada sida tooska caloosha loogu quudiyo	Wax khidmad ah ma bixinayo bukaan socodku
Qeybinta	Wax khidmad ah ma bixinayo bukaan socodku
Alaabaha nafaqada Carruurta ka yar 16 sanno	khidmada bukaanku bixinayo waa 120 karoon halkii mar ee lala soo baxo qiyaastii xaddi dabooli kara baahida ugu badnaan 90 maalmood. Waxaa ay taas macnaheedu tahay in alaabta lagu qoro ee qiyaasii dabooli karta baahida 90 maalmood, waa in halmar la dalbadaa isla markaana la keenaa si kharash bukaan socodku bixin doon u noqdo 120 karoon.
Alaabaha nafaqada Ee dadka waaweyn	Shaqsiyaadka ka weyn 16 sanno khidmada bukaanku waa boqolkiib 50 qiimaha sheygaasi joogo. Bukaanada sida joogtada ah u quuta alaabada nafaqada ee loo qorey, ee lagu magacaabo nafaqo buuxda (fullnutrition) waxaa ay bixin doonaan ugu badnaan 1500 oo karoon bishiiba

Xeerka ku saabsan kabitaan dhaqaalaha dawliga ah (subventioner) waxaa uu khuseeyaa oo kaliya haddii cida kuu qortey ay xaqiijiso in aad u qabto baahi caafimaad alaabada nafaqada iyo qalabka la socda tuumbada sida tooska caloosha loogu quudiyo (sondmatningstillbehör).

## **Waxaa muhiim ah marka uu isbedel ku yimaado xaalada degaankaaga**

Haddii aa ka guurto degaankaaga caadiga ah (gurigaaga) oo aad u guurto degaan gaar ah waa in lala xidhiidho cidii kuu soo qotey si loo hubiyo in khidmada alaabahaaga uu yahay mid sax ah.